


Sharciga linta 2006
(Disability Act 2006)

Caddaynta degaanka: Wax ku saabsan adeegyada degaanka aad hesho (Residential statement: About the residential services you get)



Somali

A Victorian
Government
initiative



Helitaanka

Dokumantigan waxaa kaloo laga heli karaa
Intarneedka ah www.dhs.vic.gov.au/disability

Waxaa daabacay Xukuumadda Victoria,
Wasaaradda Adeegga Insaanka (DHS), Waaxda
Adeegyada linta, Melbourne, Victoria, Australia.

Nofeembar 2007

© Xuquuqda Daabacaadda Xukuumadda Victoria,
Wasaaradda Adeegga Insaanka (DHS), 2007.

Daabacaaddan waa copyright. Qayb ka mid ah
lama badsan karo si kastaba ha ahaatee marka
laga reebo ayada oo la raacayo qawaaniinta
Sharciga Copyright 1968.

Waxaa fasaxay Xukuumadda Dowlad-goboleedka
Victoria, 50 Lonsdale Street, Melbourne.

Nofeembar 2007 (0531007)

Wax ku saabsan adeegyada degaanka aad hesho

Maxay ku saabsan tahay caddaynta degaanku?

Waxay ku saabsan tahay guriga aad ku nooshahay iyo caawimaadda aad hesho si aad u samayso nashaadyada nolol maalmeedka, sida cunto samaynta, cunidda iyo u-diyaargarowga shaqada.

Magaca adeegga degaanka (Name of the residential service)

X

Magacaaga (Your name)

X

Cinwaanka guriga aad ku nooshahay (Address of the house you live in)

X

.....

Wax ku saabsan adeegyada degaanka aad hesho

Waxa ay tahay in adeegga degaanku kuu qabto

- Shaqaalaha taageerada degaanku waxay ku siin doonaan caawimaadii aad ku samayn lahayd waxyaalaha aad doonaysid ama u baahan tahay si aad noloshada ugu raaxaysato.

Waxa ay tahay inaad u samaysid adeegga degaanka

- Inaad bixiso lacagta si aad ugu noolaato guriga. Kan waxaa la yiraahdaa ujuuradda degaanka
- Samee waxyaalaha sida, hubinta inaad qolkaaga ka dhigto mid nadiif ah oo habaysan intii aad kartoba.

Maxay yihiin waxyaalaha kale ee caddaynta degaanku kuu sheegayso?

Waxay kuu sheegaysaa:

1. inta ay soconayso caddaynta degaankaaga
2. waxa ay yihiin adeegyada degaanka aad heli doonto
3. inta ay le'egtahay lacagta aad u baahan tahay inaad bixiso si aad ugu noolaato gurigaaga
4. sida aad u bixinayso lacagtaas
5. wax ku saabsan waajibaadka iyo xuquuqda adeegga degaanka iyo adiga
6. macluumaadyada aadka muhiimka u ah ee kale oo aad u baahan tahay inaad ogaato. Tusaale ahaan, inta ay yihiin dadka kugula noolaanaya gurigaaga.

Kumaa ku siiyey caddaynta degaanka? (Who gave you your residential statement?)

Saxiixa (Signature)

X

Magaca qofka (Name of person)

X

Maxay tahay shaqada uu qofkaasi hayo?
(What work does this person do?)

X

Yuu u shaqeeyaa qofkaas?
(Who does this person work for?)

X

Cinwaanka bixiyaha adeegga degaanka
(Address of the residential service provider)

X

.....

Lambrka taleefanka (Telephone number)

X

Kumaa helaya koobiga caddaynta degaankaaga?

Fadlan goobaabo geli:
(Please circle:)

Maamulahaaga
(Your administrator)

✓ **Haa** ✗ **Maya**
(Yes) (No)

Haddii ay Haa tahay, waa maxay magaca qofka
(If yes, what is the person's name)

Weligaaga
(Your guardian)

✓ **Haa** ✗ **Maya**
(Yes) (No)

Haddii ay Haa tahay, waa maxay magaca qofka
(If yes, what is the person's name)

Fadlan goobaabo geli midka u yahay:
(Please circle which one:)

Dad kale (Other people)

• saaxiib
(friend)

• xubin qoyska ah
(family member)

• qareen
(advocate)

Waa maxay magaca qofka?
(What is the person's name)

Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan cidda helaysa koobiga caddaynta degaankaaga

- Waxaad u sheegi kartaa bixiyahaaga adeegga degaanka cidda aad doonayso inaad siiso koobiga caddaynta degaankaaga
- Waa xaqaaga inaad kala doorato.

Wax ku saabsan lacagta aad u baahan tahay inaad bixiso si aad gurigaaga ugu noolaato (About the money you need to pay to live in your house)

Waa intee (How much)

Goorma (When)

Fadlan goobaabo geli: (Please circle:)

- 2dii toddobaad oo kasta
(every 2 weeks)
- 4tii toddobaad oo kasta
(every 4 weeks)
- bil kasta
(every month)

Sidee (How)

Fadlan goobaabo geli: (Please circle:)

- jeeg
(cheque)
- eftpos
(eftpos)
- kaar credit card ah
(credit card)
- kuwo kale
(other)

Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan lacagta ay tahay inaad bixiso si aad ugu noolaato gurigaaga.

- Adeegga degaankaagu wuxuu kuu sheegi doonaa intay tahay lacagta aad bixinayso.
- Lacagta aad bixinayso si aad ugu noolaato gurigaaga waxaa loo yaqaan ujuurada degaanka.

Maxay daboolaysaa lacagta aad bixiso si aad ugu noolaato gurigaaga? (What the money you pay to live in your house covers?)

Lacagtu waxay daboolaysaa:

Fadlan goobaabo geli (Please circle:)

- | | | |
|---|-------------------------------|-------------------------------|
| <ul style="list-style-type: none"> • lacagta kirada (rent). Tan macnahedu waxa weeye bixinta lacageed si aad ugu noolaato gurigaaga. | <p>Haa
(Yes)</p> <p>✓</p> | <p>Maya
(No)</p> <p>✗</p> |
| <ul style="list-style-type: none"> • Biilasha (bills), tusaale ahaan korontada aad isticmaasho markii aad daarto nalka. Waxaa jira biilal kale sida biilalka gaaska iyo biyaha aad isticmaasho. | <p>Haa
(Yes)</p> <p>✓</p> | <p>Maya
(No)</p> <p>✗</p> |
| <ul style="list-style-type: none"> • biilasha taleefanka (telephone) markii aad dirtid taleefan. | <p>Haa
(Yes)</p> <p>✓</p> | <p>Maya
(No)</p> <p>✗</p> |
| <ul style="list-style-type: none"> • sariirta aad ku seexato (the bed you sleep in), barkintaada, go'yaasha sariirtaada iyo doona. | <p>Haa
(Yes)</p> <p>✓</p> | <p>Maya
(No)</p> <p>✗</p> |
| <ul style="list-style-type: none"> • cuntada iyo cabbitaanka (food and drink). | <p>Haa
(Yes)</p> <p>✓</p> | <p>Maya
(No)</p> <p>✗</p> |

Maxay daboolaysaa lacagta aad bixiso si aad ugu noolaato gurigaaga? (What the money you pay to live in your house covers?)

Lacagtu waxay daboolaysaa:

Fadlan goobaabo geli (Please circle:)

- | | | |
|---|----------------------------|----------------------------|
| <ul style="list-style-type: none"> • kuraasta fadhiga, firiijka iyo miiska qadada. Waxaa jira tusaaleyaal badan. (the couch, fridge and dinner table. There are more examples.) | <p>Haa
(Yes)
✓</p> | <p>Maya
(No)
✗</p> |
| <ul style="list-style-type: none"> • kirli, saxuun, midiyo, fargeetooyin iyo birta shiilidda. Waxaa jira tusaaleyaal badan. (kettle, plates, knives, forks and frying pan. There are more examples.) | <p>Haa
(Yes)
✓</p> | <p>Maya
(No)
✗</p> |
| <ul style="list-style-type: none"> • waxyaalo kale (other things) <p>.....</p> <p>.....</p> <p>.....</p> | <p>Haa
(Yes)
✓</p> | <p>Maya
(No)
✗</p> |

Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan ujuurada degaankaaga

- haddii aad wax jebiso waxaa lagaa doonayaa inaad bixiso lacag dheeraad ah sid aad u hesho mid cusub ama loo sameeyo wixii aad jebisey.
- Ujuurada degaanka **kuma jiraan** ‘kharashyadaada shakhsi’. Sida lacagta lagu soo gato waxyaalaha ay ka mid yihiin dharka iyo kabaha cusub waa wax dheeraad ah. lacagtaasina waxaa loo yaqaan ‘kharashyada shakhsiga ah’.

Goorma ayaad helaysaa caawimaad? (When will you get help?)

Fadlan sax ku dhig: (Please tick)

- Shaqaalaha taageerada degaanka way kula seexanayaan.
(Residential support worker will sleep-over)
- Shaqaalaha taageerada degaanka waa ay shaqeeyaan habeenkii.
(Residential support worker will work at night)

Fadlan sax ku dhig: (Please tick)

- Shaqaalaha taageerada degaanka
(Residential support worker)

Isniinta ilaa Jumcaha (Monday to Friday)

Laga bilaabo AM (gelinka hore)..... ilaa.....
(AM from) (to)

Laga bilaabo PM (gelinka dambe)..... ilaa.....
(PM from) (to)

Fadlan sax ku dhig: (Please tick)

- Shaqaalaha taageerada degaanka
(Residential support worker)

Sabtida iyo Axadda (Saturday and Sunday)

Laga bilaabo AM (gelinka hore)..... ilaa.....
(AM from) (to)

Laga bilaabo PM (gelinka dambe)..... ilaa.....
(PM from) (to)

Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan caawimaadda aad heli doonto

- waxaad kaloo heli doontaa caawimaad gurigaaga dibadiisa sida, aadidda kubadda cagta ama aadidda si aad u aragto dhakhtarkaaga.

Wax ku saabsan gurigaaga

Waxaad kaloo helaysaa maab la socda caddaynta degaankaaga. Maabkaas wuxuu wax kaaga sheegi doonaa:

- halka uu yahay qolkaaga jiifku
- qaybta guud. Tan macnaheedu waa qaybaha gurigaaga taas oo qof kastaa isticmaalo
- qaybaha gaarka ah ee gurigaaga. Tan macnaheedu waxa weeye inaad u baahan doonto inaad ogolaansho weydiisato ka hor intaadan gelin qolalkaas
- qaybaha sigaarka lagu cabo. Waa meelaha dadku sigaarka ku cabbi karaan
- waxyaalaha gurigaaga ka dhiga ammaanka. Tusaale ahaan alaamka ama deedka.

Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan gurigaaga

- Maabka aad hesho wuxuu kaloo ku tusayaa waxyaalaha ay ka midka yihiin, halka uu noqonayo deedka hore iyo kan gadaale ee gurigaaga.

Dadka kale ee ku nool gurigaaga

Immisa qof ayaa ku nool gurigaaga?
(How many people live in your house?)

Fadlan goobaabo geli (Please circle)

1, 2, 3, 4, 5, ama (or) _____

Immisa qolal jiif ayuu gurigaagu leeyahay?
(How many bedrooms does your house have?)

Fadlan goobaabo geli (Please circle)

1, 2, 3, 4, 5, ama (or) _____

**Macluumaad muhiim ah oo ku
saabsan dadka kale oo laga yaabo
inay joogi karaan gurigaaga**

Gurigaagu ma leeyahay:
(Does your house have:)

Fadlan goobaabo geli (Please circle)

Sariirta degdegga

(Emergency bed) Haa (Yes) ✓ Maya (No) ✗

Sariirta nasashada

(Respite bed) Haa (Yes) ✓ Maya (No) ✗

Wax ku saabsan qolkaaga jiifka

- qolkaaga jiifku waa meel adiga kuu gaar ah. Cidna ma soo geli karto gudaha qolkaaga jiifka ilaa aad u ogolaato.
- waxaad sheegi kartaa sidaad doonayso inay dadku ku soo galaan qolkaaga jiifka, tusaale ahaan, waxaad dadka ka codsan kartaa inay soo garaacaan albaabka ka hor intaysan gudaha soo gelin.

Macluumaad aad muhiim u ah oo ku saabsan qolkaaga jiifka

- Mararka qaarkood qofka shaqaalaha taageerada degaanka ah **waa inuu** soo galaa qolkaaga.
- Hadday haystaan sabab gaar ah. uma baahna inay ku weydiiyaan ogolaanshahaaga.

Sababtan gaarka ah waxay noqon kartaa:

- inay ilaaliyaan caafimaadkaaga ama ammaankaaga
- inay ilaaliyaan caafimaadka iyo ammaanka dadka kale ee gurigaaga jooga
- hadday u malaynayaan inaad ka carartay qolkaagii.

Wax ku saabsan qolkaaga jiifka

- si ay degdeg ugu sameeyaan wax, tusaale ahaan, daaqadda gurigaaga
- si ay kuu siiyaan caawimaadda aad u baahan tahay ama caawimaad ka mid ah qorshaha taageeradaada
- si ay u adeegsadaan xeeladaha ku jira qorshahaaga maaraynta akhlaaqda
- si ay u adeegsadaan xeeladaha ku jira qorshahaaga daawaynta
- soo-booqdaha bulshada oo u yimid inuu arko waxa ka jira gurigaaga.

Macluumaad dheeraad ah oo muhiim ah oo ku saabsan qolkaaga jiifka

- adeegaaga degaanka wuxuu qolkaaga tusi karaa qof kale. Tusaale ahaan qofka ay tahay inuu wax ka sameeyo qolkaaga
- adeegga degaanku wuxuu u baahan yahay inuu kuu sheego 1 maalin ka hor intaysan sidaas dhicin. Taasi waa inay ahaata warqad lagu soo qoro.

Wax ku saabsan taageeradaada

Miyaad leedahay:
(Do you have a)

Fadlan goobaabo
geli (Please circle)

- qorshe caafimaad
(Health plan)

Haa (Yes) ✓ Maya (No) ✗

Haddii ay Haa tahay,
fadlan ku lifaaq
(If yes please attach)

- qorshahaaga
maaraynta akhlaaqda
(behaviour management
plan)

Haa (Yes) ✓ Maya (No) ✗

Haddii ay Haa tahay,
fadlan ku lifaaq
(If yes please attach)

- kuwo kale (Other)

Haa (Yes) ✓ Maya (No) ✗

Haddii ay Haa tahay,
fadlan ku lifaaq
(If yes please attach)

Macluumaad muhiim ah

- qorshe u sheegaya adeegga degaanka nooca caawimaadda aad u baahan tahay iyo waxyaalaha aad doonaysid inaad samayso si aad ugu raaxayso naftaada
- haddii aad ku nooshahay adeegga degaanka waxaa laga yaabaa inaad leedahay qorshe, tusaale ahaan qorshe caafimaad ama qorshe taageero
- haddii aad dhawaan bilowday inaad ku noolaato adeegga degaanka, waxaad helaysaa caawimaad si aad u qorto qorshahaaga

Waxyaalaha ka dhaca gurigaaga dhexdiisa oo at tahay inaad ogaato (Things that happen in your house that you need to know about)

Tusaale ahaan:
(For example)

Fadlan googaabo
geli (Please circle)

- albaabo xiran
(Locked doors)

Haa (Yes) ✓ Maya (No) ✗

Haddii ay Haa tahay
fadlan ku lifaaq
(If yes please attach)

- armaajooyin xiran
(Locked cupboards)

Haa (Yes) ✓ Maya (No) ✗

Haddii ay Haa tahay
fadlan ku lifaaq
(If yes please attach)

- kuwo kale (Other)

Haa (Yes) ✓ Maya (No) ✗

Haddii ay Haa tahay
fadlan ku lifaaq
(If yes please attach)

Macluumaad muhiim ah

- Waxaa laga yaabaa inaad u baahato xaalado gaar ah si aad u ilaaliso caafimaadkaaga iyo ammaankaaga
- shaqaalaha taageerada degaanka waxay ku tusayaan sida waxyaalaha loogu sameeyo siyaabo kale sidaas darteed uma baahan doontid xaaladahaas gaarka ah.

Macluumaadka kale oo muhiim ah oo ku saabsan gurigaaga (Other important information about your home)

Miyaad leedahay:
(Can you have)

Fadlan goobaabo geli (Please circle)

- | | | |
|---|----------------|----------------|
| • soo-booqdeyaal, tusaale ahaan dadka aad ogtahay inay imaanayaan si ay kuugu soo booqdaan gurigaaga (visitors, for example people you know coming over to see you at your house) | Haa (Yes)
✓ | Maya (No)
✗ |
| • soo-booqdeyaal, tusaale ahaan dadka aad ogtahay inay imaanayaan si ay uga casheeyaan gurigaaga (visitors, for example people you know coming to have dinner at your house) | Haa (Yes)
✓ | Maya (No)
✗ |
| • qiiqa (a smoke) | Haa (Yes)
✓ | Maya (No)
✗ |
| • xayawaan rabaayad ah, tusaale ahaan shimbir, eey (have pets, for example bird, dog) | Haa (Yes)
✓ | Maya (No)
✗ |
| • kuwo kale (other) | Haa (Yes)
✓ | Maya (No)
✗ |

Wixii macluumaad dheeraad ah

www.dhs.vic.gov.au/disability

disability.legislation@dhs.vic.gov.au

1300 366 731

9 am (gelinka hore) – 5 pm (gelinka dambe)

Isniinta ilaa Jumcaha

TTY: (03) 9096 0133

Waxaa loogu talagalay dadka dhagaha la' ama ay hayaan dhibaato maqal, hadal ama wada-xiriir.

Sharciga linta 2006

(Disability Act 2006)

**Qaybta A: (Part A:) Wax ku saabsan
waajibaadka iyo xuquuqda adeegga
degaanka iyo adiga (About the duties
and rights of the residential service and you)**

Somali

A Victorian
Government
initiative



Waxaa ku jira buuggan

Muxuu sharciga cusub ka oranayaa helidda adeegyada degaanka? Bogga 4 aad

Maxay tahay adeegga degaanku inuu kaqabto gurigaaga Bogga 5 aad

3 waxyaalood oo muhiim ah oo aad u baahan tahay inaad ka ogaato xuquuqdaada Bogga 7 aad

Waxa ay tahay inaad ka samayso gurigaaga Bogga 8 aad

Waxa ay tahay **inaadan** ka samayn gurigaaga Bogga 9 aad

Waxaad samayn karto haddii aadan ku faraxsanayn gurigaaga Bogga 10 aad

Maxay yihiin tallaabooyinka la-kulanka Soo-booqdaha bulshada? Bogga 11 aad

Muxuu samayn karaa soo-booqdaha bulshadu markii uu joogo gurigaaga? Bogga 12 aad

Waxa ay yihiin macnaha erayadan Bogga 13 aad

Muxuu sharciga cusub ka oranayaa helidda adeegyada degaanka?

Sharciga cusub wuxuu oranayaa inaad xaq u leedahay inaad:

- hesho macluumaad ku saabsan waxa ay yihiin xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga, markii aad ku nooshahay adeegga degaanka
- hesho macluumaad ku saabsan waxa ay yihiin xuquuqda iyo waajibaadka bixiyaha adeegga degaanka
- hesho macluumaadka ay fududahay in la akhriyo ayna fududahay in la fahmo
- weydiisato qofkaaga taageeraha ah wixii caawimaad ah si aad u fahamto macluumaadka aad hesho.

Waxa ay tahay in adeegga degaanku kuugu sameeyo gurigaaga dhexdiisa

Adeegga degaanku wuxuu waajib u leeyahay inuu:

- kuu wanaagsanaado kuulana dhaqmo sharaf iyo ixtiraam
- ixtiraamo baahida aad u qabto qarsoodinimada
- ku siiyo faahfaahinta xiriirkooda
- ammaan kaa siiyo dadka kale ee ku nool gurigaaga. Tusaale ahaan dadka laga yaabo inay ku dhaawacaan ama waxyeelleeyaan alaabadaada.

Waxa ay tahay in adeegga degaanku kuugu sameeyo gurigaaga dhexdiisa

Adeegga degaanku wuxuu **waajib** u leeyahay inuu hubiyo in:

- guriga iyo saabaanku ay fiican yihiin
- dayactirada dedeg loo dhammaystiro
- gurigaagu ammaan yahay.

3 waxyaalood oo muhiim ah oo aad u baahan tahay inaad ka ogaato xuquuqdaada

Waxaad xor u tahay inaad ku dhex socoto gurigaaga, jardiinkaaga iyo bulshadaada inaad leedahay **mooyee**:

- **qorsha maaraynta akhlaaqda** uu arkay Dhakhtar Waayo-arag ah uuna yiri waa okay
- **qorshaha daaweynta**
- uu sheegay **Dhakhtar Waayo-arag** ah.

Macluumaad muhiim ah ee qorsheyaashan ku saabsan

Qorsheyaashan waxay leeyihiin xeelado ay shaqaalaha taageerada degaanku adeegsan doonaan si lagaaga joojiyo inaad dhaawacdo naftaada, dadka kale dhaawacdo ama waxyeellayso hantidooda.

Hirgelinta xeeladahaas waxay adiga iyo dadka kaleba ka dhigaysaa ammaan.

Waxa ay tahay inaad ka samayso gurigaaga

Waxaad **waajib** u leedahay inaad:

- bixiso lacagta kirada taariikhda uu ku eg yahay
- hubiso inaysan jirin waxyaalo khatar ah ee qolkaaga jiifka ama gurigaaga dhexdiisa
- u sheegto qof kale haddii aad wax jebiso
- bixiso waxyeellada aad gaysato oo aan shilka ahayn.

Waxa ay tahay inaad ka samayn gurigaaga

Waa **inaadan**:

- u adeegsan gurigaaga inaad ku dhex samayso waxyaalaha **sharci-darrada** ah
- ka joojin dadka aad la nooshahay inay u raaxaystaan naftooda. Tusaale ahaan, wax ha ku dhufan ama ha dhibin dadka aad la nooshahay
- ula-jeedo ahaan ha u jabin alaabta gurigaaga
- ku xirin waxyaalo cusub adoon codsan.

Waxaad samayn karto haddii aadan ku faraxsanayn gurigaaga

Waxaad xaq u leedahay inaad:

- la kulanto soo-booqdaha bulshada
- samayso **cabasho**. Waxaad adeegsan kartaa foomka uu ku siiyo adeegga degaanku
- la hadasho Kumasaariyaha Adeegyada linta. Qofkan magaciisu waa Laurie Harkin.

Maxay yihiin tallaabooyinka la kulanka soo-booqdaha bulshada?

Adiga, xubin qoyska ah ama saaxiib ayaa la hadli kara adeegga degaanka oo weydiisan kara la kulan soo-booqdaha bulshada.

Adeegga degaanka waa inuu u sheegaa soo-booqdaha bulshada **3 maalmood** gudahooda inaad doonaysid la kulan.

Soo-booqdaha bulshada wuxuu iman doonaa gurigaaga wuxuuna kugula kulmi doonaa **7 maalmood** gudahooda.

Macluumaad muhiim ah

Waa **xuquuqdaada** inaad la kulanto soo-booqdaha bulshada.

Muxuu samayn karaa soo-booqdaha bulshada markii ay joogaan gurigaaga?

Soo-booqdaha bulshadu wuxuu:

- eegaa agagaarka gurigaaga iyo qolkaaga
- la kulmaa adiga iyo dadka kale ee ku nool guriga
- weydiiyaa su'aalo ku saabsan gurigaaga iyo caawimaadda aad heshid
- ka soo akhriyaa macluumaadka kuugu saabsan ee ku yaalla faylasha adeegyada degaanka
- soo akhriyaa warbixinta dhakhtarka ee ku saabsan, haddii aad ogolaato.

Waxa ay yihiin macnaha erayadan

Sharciga cusub

Laga soo bilaabo 1da Luuliyo 2007 Sharciga linta 2006 waa sharciga cusub oo loogu talagalay dadka iinta leh.

deganeyaal

Waa dadka ku dhex nool adeegga degaanka.
Waa gurigaaga.

adeegga degaanka

Waa adeegga bixiya guryo iyo shaqaalaha taageerada degaanka si ay dadka iinta leh uga caawiyaan nashaadyada nolol maalmeedka.

soo-booqdaha bulshada

Waa qofka taga adeegga degaanka si uu u hubiyo waxa ka dhacaya uuna kuu taageero.

Dhakhtar Waayo-arag ah

Qofkan wuxuu hubiyaa in la ilaaliyo xuquuqda dadka iinta leh kuwaas oo dhaawaca naftooda, dhaawaca dadka kale ama waxyeelleeya hantida.

qorsha maaraynta akhlaaqda

Qorsheyaashan waxay u sheegayaan shaqaalaha taageerada degaanka sida lagaaga caawin karo inaad joojiso dhaawicidda naftaada iyo dhaawicidda dadka kale ama waxyeellaynta hantida.

Qorsheyaashan waxay u sheegayaan shaqaalaha taageerada degaanka siday kuu tusi lahaayeen siyaabo kale ee wax loo sameeyo.

Waxa ay yihiin macnaha erayadan

qorshaha daaweynta

Qorshahan waxaa loogu talagalay dadka dhaawaca dadka kale. Qorshaha daawaynta wuxuu u sheegayaa shaqaalaha taageerada degaanka sida lagaaga caawin karo inaad joojiso dhaawicidda dadka kale. Shaqaalaha taageerada degaanka waxay kugu caawin doonaan inaad barato habab cusub si nololshaadu u noqoto mid wacan.

Dadka ku jira qorshaha daawaynta waxay u baahan doonaan inay codsadaan ka hor intaysan dibadda aadin, iyo wax ku saabsan waxay ay samayn karaan ama aysan samayn karin bulshada dhexdeed.

Macluumaad muhiim ah

Taas macnaheedu waa in maclummadkan uu aad muhiim u yahay.

Halka laga raadsado macluumaad dheeraad ah

www.dhs.vic.gov.au/disability

disability.legislation@dhs.vic.gov.au

1300 366 731

9 am (gelinka hore) – 5 pm (gelinka dambe)

Isniinta ilaa Jumcaha

TTY: (03) 9096 0133

waxaa loogu talagalay dadka dhagaha la' ama ay
hayaan dhibaato maqal, hadal ama wada-xiriir.

Sharciga linta 2006
(Disability Act 2006)

Qaybta B: (Part B:)
Wax ku saabsan ka guuridda gurigaaga
(About moving from your house)

Somali

A Victorian
Government
initiative



Waxaa ku jira buuggan

Muxuu sharciga cusub ka oranayaa helidda adeegyada degaanka?	Bogga 4 aad
Maxaa dhacaya markii adeegaaga degaanku uu yiraahdo waa inaad u guurtaa guri kale ilaa intii muddo gaaban ah?	Bogga 5 aad
Maxaa dhacaya haddii aadan doonayn inaad guurto?	Bogga 6 aad
Yaa kaloo u baahan inuu ogaado inay tahay inaad ka guurto guriga ilaa in muddo gaaban ah?	Bogga 7 aad
Maxaad samayn kartaa haddii aadan weli ku faraxsanayn inaad guri kale u guurto ilaa intii muddo gaaban ah?	Bogga 8 aad
Maxaa dhacaya markii adeegga degaankaagu uu yiraahdo kuma soo noqon kartid gurigaaga?	Bogga 9 aad
Yaa kaloo u baahan inuu ogaado inaad si joogto ah uga guurayso gurigaaga?	Bogga 10 aad
Maxaa dhacaya markii ay adeegga degaankaagu ay baddalaan ra'yigoodii ayna doonayaan inaad joogto?	Bogga 11 aad
Waxaad u baahan tahay inaad samayso markii aad doonaysid inaad ka guurto gurigaaga oo aadan ku soo noqonayn?	Bogga 12 aad
Yaa kaloo u baahan inuu ogaado inaad doonaysid inaad ka guurto gurigaaga?	Bogga 13 aad
Yaa kaloo u baahan inuu ogaado inaad doonaysid inaad ka guurto gurigaaga?	Bogga 14 aad
Maxaa dhacaya markii aad badasho ra'yigaagii aadna doonayso inaad sii deganaato gurigaaga?	Bogga 15 aad
Waa maxay macnaha erayadan	Bogga 16 aad
Halka laga raadsado macluumaad dheeraad ah	Bogga 18 aad

Muxuu sharciga cusub ka oranayaa helidda adeegyada degaanka?

Sharciga cusub wuxuu oranayaa inaad xaq u leedahay inaad:

- hesho macluumaad ku saabsan waxa ay yihiin xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga, markii aad ku nooshahay adeegga degaanka
- in lagu taageero hab wanaagsan taas oo ka dhigaysaa adiga iyo dadka aad la nooshahay kuwo faraxsan
- hesho macluumaad ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka adeegga degaanka
- hesho macluumaadka ay fududahay in la akhriyo ayna fududahay in la fahmo
- weydiisato qofkaaga taageeraha ah wixii caawimaad ah si aad u fahamto macluumaadka aad hesho.

Maxaa dhacaya markii adeegga degaankaagu yiraahdo waa inaad u guurtaa guri kale ilaa intii muddo gaaban ah?

Adeegga degankaagu:

- wuxuu kaa codsan karaa in lagu **raro** guri kale sababta oo ah waxaa jira dhibaato

Tusaale adiga oo aan jeclayn cid kale oo aad la nooshahay meeshana uu dagaal ka dhaco mar kasta.

- wuxuu u sheegayaa qofkaaga taageeraha ah inay tahay inaad u guurto guri kale.

Qofkaaga taageeraha ah wuxuu noqon karaa qoyskaaga, saaxiibkaa, qareenkaaga, weligaaga ama maamulahaaga

- wuxuu ku weydiin doonaa haddii aad ku faraxsan tahay inaad u guurto guri kale ilaa in muddo gaaban ah, si ay isugu dayaan inay xalliyaan dhibaataada
- wuxuu kala hadli doonaa adiga iyo qofkaaga taageeraha ah maalinta aad guuri doonto, haddii aad ku faraxsan tahay inaad guurto.

Maxaa dhacaya haddii aadan doonayn inaad guurto?

Haddii aadan ku faraxsanayn inaad guurto, waxaad warqad ka helaysaa adeegga degaankaaga. Warqaddaas,

- waxaa loo yaqaan **ogaysiinta raridda ku-meelgaarka ah**
- waxay wax kaaga sheegaysaa guriga aad u guuri doonto
- waxay kuu sheegaysaa intay qaadanayso guuriddu
- waxay kaloo oranaysaa in adeegga degaanku xallin doono dhibaataada si aad ugu soo noqoto guriga.

Macluumaad muhiim ah

Waxaad u baahan kartaa inaad sii deganaato gurigaaga cusub ilaa 3 bilood.

Yaa kaloo u baahan inuu ogaado inay tahay inaad ka guurto guriga ilaa in muddo gaaban ah?

Adeegga degaankaagu waa inuu u sheegaa:

- **Xoghayaha**, Wasaaradda Adeegga Insaanka
- Xafiiska Qareenka Dadweynaha.

Adeegga degaanku waa inuu ku sameeyaa sidaas **1 maalin** gudaheed.

Maxaad samayn kartaa markii aadan weli ku faraxsanayn inaad guurto ilaa intii muddo gaaban ah?

Haddii aad hesho warqadda loo yaqaan
ogaysiinta raridda ku-meelgaarka ah oo aadan
weli ku faraxsanayn

- Waxaad **cabasho** u qori kartaa
Kumasaariyaha Adeegyada linta.

Maxaa dhacaya haddii adeegga degaankaagu yiraahdo kuma soo noqon kartid gurigaaga?

Adeegga degaankaagu wuxuu ku siinayaa warqad.

- Warqaddaas waxaa loo yaqaan **ogaysiinta ka-guuridda**

Taas macnaheedu waxa weeye in adeegga degaankaagu uusan xallin karin dhibaataada aana lagu ogolayn inaad ku soo noqoto gurigaaga.

Macluumaad muhiim ah

Adeegga degaankaagu wuxuu kaala hadli doonaa adiga iyo qofkaaga taageeraha ah si aad uga wada shaqaysaan waxa ku xigi doona.

Tusaale ahaan waxaa laga yaabaa inaad hesho caawimaad si aad ugu guurto guri kale.

Qofkaaga taageeraha ah wuxuu noqon karaa qoyskaaga, saaxiibkaa, qareenkaaga, weligaaga ama maamulahaaga.

Yaa kaloo u baahan inuu ogaado inaad si joogto ah uga guurto gurigaaga?

Haddii aad hesho warqadda loo yaqaan ogaysiinta ka-guuridda, adeegga degaankaagu waa inuu kuu sheegaa:

- Xoghayaha, Wasaaradda Adeegga Insaanka
- **Xafiiska Qareenka Dadweynaha**

Adeegga degaanku waa inuu sameeyaa sidaas **1 maalin** gudaheed.

Maxaa dhacaya markii ay adeegga degaankaaga ay baddalaan ra'yigoodii ayna doonayaan inaad sii joogto?

Adeegga degaankaagu wuxuu baddeli karaa ra'yigooda ku saabsan inaad guurto. Haddii ay doonayaan inaad sii deganaato waxay ku siin doonaan:

- warqad loo yaqaan **ka-noqoshada ogaysiinta ka-guuridda**.

Taas macnaheedu waxa weeye in adeegga degaankaagu inuu xalliyey dhibaata laguuna oggol yahay inaad sii deganaato gurigaaga

Maxaa dhacaya markii aadan doonayn inaad ka guurto gurigaaga?

- Haddii aad hesho warqadda loo yaqaan ogaysiinta ka-guuridda oo aadan ku faraxsanayn
- waxaad caawimaad ka codsan kartaa **Maxkamadda Madaniga iyo Maamulka ee Victoria.**

Waxaad u baahan tahay inaad samayso markii aad doonaysid inaad ka guurto gurigaaga oo aadan ku soo noqonayn?

Haddii aad doorato inaad ka guurto gurigaaga, waa inaad:

- siisaa adeegga degaankaaga warqad loo yaqaan **Ogaysiinta Go'aanka Ka-guuridda**.

Taas macnaheedu waa inaad doonaysid inaad ka guurto gurigaaga aadna ku soo noqonayn.

Haddii aad u baahan tahay caawimaad sidaad u qori lahayd warqaddaas waxaad weydiisan kartaa caawimaad maamulahaaga, weligaaga ama qofka ku taageera.

- u sheeg adeegga degaankaaga maalinta aad doonaysid inaad ka guurto gurigaaga.

Yaa kaloo u baahan inuu ogaado inaad doonayso inaad ka guurto gurigaaga?

Adeegga degaankaagu waa inuu u sheegaa,

- Xoghayaha, Wasaaradda Adeegga Insaanka

Adeegga degaanku waa inuu arintaa ku qabtaa **1 maalin** gudaheeda.

Maxaa dhacaya markii aad badasho fikraddadii aadna doonayso inaad sii deganaato gurigaaga?

Macluumaad muhiim ah

Waad baddeli kartaa ra'yigaaga ku saabsan inaad guurto.

Haddii aad baddesho ra'yigaaga waxaad u baahan doontaa inaad warqad kale soo-qorto taas oo leh inaad doonaysid inaad sii deganaato guriga.

Warqaddaas waxaa loo yaqaan **Ka-noqoshada ogaysiinta go'aanka ka-guuridda.**

Maxay yihiin macnaha erayadan

sharciga cusub

Laga soo bilaabo 1da Luuliyo 2007 Sharciga linta 2006 waa sharciga cusub oo loogu talagalay dadka iinta leh.

deganeyaal

Waa dadka ku nool adeegga degaanka. Waa gurigaaga.

adeegga degaanka

Waa adeegga bixiya guryo iyo shaqaalaha taageerada degaanka si ay dadka iinta leh uga caawiyaan nashaadyada nolol maalmeedka.

Xafiiska Qareenka Dadweynaha

Wuxuu ilaaliyaa xuquuqda dadka iinta leh.

Xafiiska Qareenka Dadweynaha wuxuu kaa caawin karaa arimo badan.

Maxkamadda Madaniga iyo Maamulka ee Victoria

Tani waa maxkamad yar oo kale taas oo go'aano samaysa.

macluumaad muhiim ah

Taas macnaheedu waa in maclummadkan uu aad muhiim u yahay.

Kumasaariyaha Adeegyada linta

Waa qofka eega oo kala hadla adeegga degaanka arimaha cabashooyinka, Qofkan magaciisa waa Laurie Harkin. Qofkan dhinacna ma xigsado.

Maxay yihiin macnaha erayadan

Rarid

Waa u guuridda in lagu noolaado guri kale. Taasna waxaa loo yaqaan rarid. Haddii aad in muddo gaaban ah aad guurto taas waxaa loo yaqaan raridda ku-meel-gaarka ah. Erayga **ku-meelgaar** macnihiisu waa muddo gaaban.

Xoghaye

Waa qofka ka masuulka ah Wasaaradda Adeegyada Insaanka. Qofkan waa Fran Thorn.

ogaysiinta ka-guuridda

Waa warqad oronaysa inaad ka guurto gurigaaga.

Ka-noqoshada ogaysiinta ka- guuridda

Waa warqad oronaysa adeegga degaankaagu wuxuu doonayaa inaad sii deganaato oo aadan ka guurin gurigaaga.

Ogaysiinta Go'aanka Ka-guuridda

Warqaddan waxay oronaysaa inaad doonaysid inaad ka guurto gurigaaga oo aadan ku soo noqon. Warqaddan waxaa loo yaqaan ogaysiinta go'aanka ka-guuridda.

Ka-noqoshada ogaysiinta go'aanka ka-guuridda

Warqaddan waxay oranaysaa inaad baddeshey ra'yigaagii oo aad doonaysid inaad sii deganaato gurigaaga.

Halka laga raadsado macluumaad dheeraad ah

www.dhs.vic.gov.au/disability

disability.legislation@dhs.vic.gov.au

1300 366 731

9 am (gelinka hore) – 5 pm (gelinka dambe)

Isniinta ilaa Jumcaha

TTY: (03) 9096 0133

Waxaa loogu talagalay dadka dhagaha la' ama ay hayaan dhibaato maqal, hadal ama wada-xiriir.

